




Xaashida Xaqiiqda COVID-19 ee Codbixiyayaasha

Oregon horeba waxay u ahayd gobol boostada lagu codeeyo. Ku codaynta boostadu waa habka ugu badbaado badan ee aad codkaaga ku dhiiban karto ugana fogaan karto COVID-19. Xoghayaha Gobolka Oregon wuxuu dhiirigelinayaa dhammaan codbixiyayaasha u-qalmo inay codeeyaan. Si loo hubiyo reer Oregon inay baadqab ahaadaan, Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu ku talinayaa waxyaabaha soo socda:



Inay xirtaan maaskaro/afsaab markii ay codka ku soo ridayaan sanduuqa codaynta ama sanduuqa boostada bulshada.

- Inta aad warqadda codaynta sanduuqa ku soo ridayso, xirnow afaaab si aad u xaqiijiso in aad sida ugu badan ee suurtoogalka ah uga badbaado caabuqa.
- Haddii codbixiyayaal kale ay sanduuqa joogaan markaad adigu ku ridayso, had iyo jeer u jirso lix fuud jir ahaan.



Taxaddar samee haddii ay khasab kugu tahay inaad furto sanduuqa codbixinta ama sanduuqa boostada.

- In kastoo sanduuqyada codaynta iyo sanduuqyada boostadu ay leeyihiin daloolo aan u baahnayn taabasho, sanduuqyada codaynta iyo kuwa boostada oo kooban ayaa u baahan taabashada sanduuqa si loo furo. Xaaladahan oo kale, isticmaal maro ama gacmo-gashiyo si aad sanduuqa u furto oo gacmahaaga dhaq kadib marka aad ku riddo warqadda codaynta.
- Istickmaal gacmo nadiifiye isla markiiba, ama ku dhaq gacmahaga saabuun iyo biyo muddo 20 ilbiriqsi ah markii aad guriga ku soo laabato.



Isticmaalidda sanduuqyada codaynta ama US Mail ayaa ah qaabka la doorbidayo ee codaynta oo lacagta boostadana hore ayaa loo sii bixiyey. Haddii aad sanduuqa kaga ridayso warqaddaada codaynta xafiis doorasho, waxa khasab ah inaad:

- Raacdo xeerarka iyo tilmaamaha xafiiska doorashada ee kusaabsan kala fogaanshaha iyo tilmaamaha socsocodka.
- Xirato afsaab.
- Ugu yaraan lix fuud ka fogaato shaqaalaha doorashada iyo dadka kale ee codaynta.
- Aanu jirkaagu taaban shaqaalaha ama codbixiyayaasha kale.

Helitaanka Dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsaha.state.or.us.